

Dugsiga Dhexe ee Hosford

MACLUUMAAD KU SAABSAN DUGSIGAYAGA

Dugsiga Dhexe ee Hosford waxa uu ku wareegaa:

Saaxiibtinimo - Waxbarasho - Joogtayn

Ardayda iyo shaqaalaha Hosford waxa ka go'an dhisitaanka iyo ilaalinta xidhiihdada ay isla leeyihiin bulshadeenana ay la leeyihiin; barashada wax ku saabsan nafaheena, dadka kale, iyo adduunka. Wuxuu aanu ka doonaynaa arday walba iyo qoys walba inay dareemaan soo dhaweyn, kamid ahaansho, iyo xiise ay u qabaan waxbarashada iyo koritaanka. Wuxuu aanu aaminsanahay xidhiihhadu inay yihiin muhiim, waxana aanu doonaynaa in aanu kuu barano adiga iyo ardaygaaga si wanaagsan.



WAAYO HOSFORD?


Waxbarashada

Marka aanu Hosford joogno, waxa aanu ugu hanweynahay nafaheena **heerarka waxbarashada ee adag**. Inkasta oo macallimiinteenoo u qaabaynayaan casharadooda si waafaqsan eerarka Gobolka Oregon, waxa ay sidoo kale xaqiijinayaan in ardayda la maalgeliyo, la hawlgeeliyo, oo la cariyo.

AVID

Horumarka Loo Marayo Go'aanka

Shakhsiyeed (**AVID**) waa urur aan macaash doon ahayn oo caalamiya



Kaas oo ku shaqeeya hal mabda' oo

Hage ah: kadhig ardayda kuwo lagula xisaabtamo eerarka ugu sarreeya, bixi taageero waxbarasho iyo mid bulsheed, waxana ay kor ugu kici doonaan eerka carinta. Nidaamka Diyaarsanaanta Kulliyadda AVID waxa uu keenayaa manhaj ku salaysan cilmi-baadhis iyo farsamooyin loogu talagalay ardayda kuwaas oo horumarinaya xirfadaha fikirka qiimaynta leh, aqoonta akhriska iyo qoraalka, iyo xisaabta dhamaan aagagga ay ka kooban yihiin duruustu.

Kobcin



Hosford waxa ay siinaysaa **maadooyinka la kala dooranayo** ardayda, oo ay ku jiraan Hogaaminta Ardayga, Luuqadda Isbaanishka (laba heer), Koox Muusigeedka (saddex heer), Farshaxanka (saddex heer), Tiknoonaliyadda Koombuyutarka, Aqoonta Warbaahinta, Wershadda Looxa, Muhandisnimada, PE/Caafimaadka, iyo Yoogada.

Taas waxa dheer, PTSA gayagu waxa uu siiyaa fasallo H.E.A.T ah (Dhawr-iyo-toban Jirrada Firfircoor ee La Hawlgaliyey ee Hosford) **fasallo kobcin ah** oo la xoojiyey oo ardayga diiradda lagu saarayo oo wakhtigeedu yahay dugisga kadib oo ay heli karaan dhamaan ardaydu – ma jiro arday la diidayaa. Qaar kamid ah fasallada ugu caansan waxa kamid ah: Waxkarinta, Naadiga Xisaabta, Naadiga Jesta, Hadalka & Doodda, Yoogada, Naadiga Sameeyayaasha, Neo Geo, iyo Qoraalka Halabuurka leh.



Wax-ku-barshada Mandarin

Hosford waxa weeyi dugsi **Wax Lagu Barto**

Mandarin; afar meeloodow meel kamid ah ardaydayada waxa ay wadaan waxbarashadii Mandarin ee ay bilaabeen dugsigii hoose. Wuxuu aanu kala shaqaynaa Dugsiga Dhexe ee LiDa Suzhou, ee Shiihaha isubeddel arday oo sanadle ah. Inta ay joogaan Shiihaha, ardayda MIP ee fasalka 8 aad waxa ay dhamaystaan CRR kooga (Cilmibaadhista Deganaanshiyaha Shiihaha) oo ah Mashruucooga Capstone.

Sinnaan

Hosford waxay diiradda saartay **sinaanta**; sinnaanta jinsiga, sinnaanta qowmiyeed, iyo sinnaanta waxbarasho. Si taas loo xaqiijyo, waxa aanu u samaynay kooxo isku xidhnaasho ardaydayada si ay u helaan goobo amaan ah oo ay ku kulmaan, isu kaashadaan, oo ku amaan helaan. Waxa naga go'an inaanu Noqono bulsho dugsi oo liddi Ku ah Kala Sooca.

